WASAARADDA WAXBARASHADA HIDDAHA
IYO TACLIINTA SARE

IMTIXAANKA FASALKA 8AAD. 2022

# AF-SOOMAALI

2022

XAFIISKA IMTIXAANKA IYO SHAHAADADA

SomExams

Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya
Maamulka Gobolka Banaadir
Agaasinka Waxbarashada

جمهورية الصومال الفيدرالية
ادارة محافظة بنادر
مديرية التعليم

Federal Republic of Somalia
Banadir Regional Administration
Education Directorate

Xafiiska Imtixaanaadka & Shahaadooyinka

# SHAHAADADA SOOMAALIYEED EE TACLIINTA

| FASALKA | 8AAD | MAADDO | Af-SOOMAALI | SANAD | 2021-2022 |
|---|---|---|---|---|---|

| | |
|---|---|
| **Magac Afaran:** | |
| **Rool Lambar:** | |
| **Dugsiga:** | |
| **Xarunta:** | |

**Fadlan u akhri tilmaamaha si kaadsiiyo leh kahor inta aadan ka jawaabin su'aalaha:**

- Ku qor meelaha u bannaan magaca oo dhammeystiran, roollambar, dugsiga iyo xarunta.
- Ka jawaab dhammaan su'aalaha. Su'aashii aan laga jawaabin lama saxayo.
- U qor si muuqata, kuna qor qalin leh qad buluug ah.
- Isku day in aad ka jawaabto dhammaan su'aalaha imtixaanka.
- Ku toosnow dhammaan shuruucda imtixaanka iyo waqtiga loo xaddiday.

**Hubi in imtixaanku ka koobanyahay 5 Bog**



AMAL PRINTING CENTER 0619444...

☞ www.somexams.com   info@somexams.com   © In cooperation with www.qalinqaad.com

**QAYBTA 1AAD: SHEEKO (GEELA)**

Marka dhaqanka Soomaalida ee soo jireenka ah laga hadlayo, geelu waa hantida ugu qiimaha badan ee nolosha dadka Soomaalida. Waxyaabaha kuu caddaynaya ama aad ka dheehan karto qiimihiisa waxa ka mid ah: in uu yahay halbeega magta qofka bini'aadamka ah, in guurka iyo gayaanka uu kow ka yahay waxyaabaha la isa siiyo, in uu gaadiid inoo yahay, in aan ka helno hilib iyo caano nolosheenu ku tiirsantahay iyo waxyaabo kale oo badan. Haddaba qofka la dilo magtiisa waxa lagu qiyaasaa geela. Sidaa si la mid ah,qofkii nabar culusi soo gaadho, isagana magdhawga xubinta nabarku gaadhay waxaa lagu qiimeeyaa geel, waxaana loo adeegsadaa erayada kala ah, hal, laba halaad, hal daloolkeed, iwm, iyada oo lagu salaynayo hadba baaxadda nabarka iyo waxyeellada uu u leeyahay jirka/jidhka dhibbanaha. Magdhawyada iyo xaqidda aynu ka hadlayno waxaa had iyo jeer shareecada diinta islaamka lagala kaashada culimada.

Marka qoys cusub la yagleelayo dadka Soomaalidu waxa ay hablaha ka bixiyaan geel oo ay ku xididaan. Geela waxa aynu ka helnaa dhaqaale (lacag) sababta oo ah, waxa aynu u dhoofinaa dalalka dibedda, gaar ahaan waddamada carabta. Sidoo kale geela waxa aynu ka helnaa hilib aynu cunno iyo caano aan dhanno. Caanaha geelu waxa ay caanaha kale oo dhan kaga duwan yihiin iyaga oo oolli kara muddo dheer oo toddobaadyo ah, isla markaana la cabbi karo. Geelu marka uu yaryar yahay waxa la kala yidhaa/yiraa, labkiisa iyo dheddigiisa qurbac iyo nirig.

Qurbacu marka uu koro ee uu waynaado waxa uu noqdaa awr, nirigtuna waxa ay noqotaa hal. Geelu marka la xeriyo waxa uu yeelanayaa awr baarqab ah, nin mas'uul ah iyo ugu yaraan hal wiil oo loo yaqaan dabadhoon. Erayga xerin waxaa looga jeedaa marka geela loo raro meel barwaaqo ah oo ka fog meesha reeruhu deganyihiin. Baarqabku waa labka ugu qiimaha iyo quruxda badan ee geela, waxaana lagu xushaa qoodhnimadiisa/qoornimadiisa iyo hidda raaca. Erayga qoodhnimo/qoornimo waxaa looga jeedaa qurux,qaro iyo joog. Sababta oo ah awrka baarqabka ah waxa shuruudahaas loogu xidhayaa/xirayaa tafiir fiican ayaa laga rabaa. Geela tirada yar ee aan la xerin looguma yeedho/yeero geel waxaana loogu yeedhaa/yeeraa halo. Qaalinta geela ahi marka ay rinto waxa uu sedkeedu yahay 13 saddex iyo toban bilood.

Hashu marka neefka ay uurka ku siddo kasoo dhaco isaga oo aan waqtigiisii gaadhin lama yidhaahdo hashii way dhicisay ee waxaa la adeegsadaa eray geela u gaar ah oo ah ''hashii way cabaad-dheeraysay ama way buruurisay. Hasha uu ilmuhu ka dhinto si aanay u gudhin oo caanaha looga sii maalo laba hab ayaa la adeegsadaa:

- In maqaar lagu tolo, oo micnaheedu yahay haraggii nrrfka ka dhintay oo lagu qasbo in uu ilmaheedii yahay oo marka la hor dhigo naasaha loo salaaxo oo ay godlato.

- In neef kale oo nirig iyo qurbac midkuu doono ha ahaadee lagu sidko hashuna sidaa ku ahaato mid irmaan oo la sii maalo.



<u>Goobo gali weerahaan soo socda xarafka muujinaya jawaabta saxda ah (14 dhibcood)</u>

| | | | | |
|---|---|---|---|---|
| 1. | **Waxyaabaha kuu caddaynaya qiimaha geelu waa in uu:** | | | |
| | B.Adkaysi badan yahay. | T.Gaadiid inoo yahay. | J.Qurux badan yahay. | X-Dhaxal inoo yahay. |
| 2. | **Qofka nabar culusi gaadhay geela la siinayo waxaa loo adeegsadaa erayga:** | | | |
| | B. Hal daloolkeed. | T. Magdhaw. | J. Kadin. | X. Dhaymo. |
| 3. | **Arrimaha xaqidda waxaa lagala tashadaa:** | | | |
| | B. Oday dhaqameedka. | T. Aqoonyahanka. | J. Dhallinyarada. | X. Culimada. |
| 4. | **Marka qoys cusub la dhisayo soomaalidu waxa ay ka bixiyaan:** | | | |
| | B. Geel. | T.Gammaan. | J. Qori. | X.Lacag. |
| 5. | **Geela waxa aynu ka helnaa dhaqaale sababta oo ah waynu:** | | | |
| | B. Raranaa. | T. Qalanaa. | J. Dhoofinaa. | X.Dhaqanaa. |
| 6. | **Caanaha geelu waxa ay caanaha kale kaga duwan yihiin in ay ka:** | | | |
| | B. Muddo dheeryihiin. | T.Nafaqo badanyihiin. | J. Macaan yihiin. | X. Badanyihiin. |
| 7. | **Qurbacu marka uu koro waxa uu noqdaa:** | | | |
| | B. Qaalin. | T. Awr. | J. Baarqab. | X. Aaran |



☞ www.somexams.com ֍ info@somexams.com © In cooperation with www.qalinqaad.com

## QAYBTA 2AAD:ISKU AADDI (32 Dhibcood)

A. **ISKU AADDI ERAYADA ISKU MACNAHA AH** (16 dhibcood)

| TT | Eray | Isku xir | Macnaha |
|---|---|---|---|
| 8. | Luul | | Taajir |
| 9. | Oodkac | | Duleedka |
| 10. | Xilli | | Noole |
| 11. | Amaah | | Dhiijin |
| 12. | Lisid | | Dayn |
| 13. | San ku neefle | | Ammin |
| 14. | Duddada | | Muqmad |
| 15. | Maalqabeen | | Dhayman |

B. **Eryadan kelida ah ka dhig wadar**(16 dhibcood)

| TT | Keli | Wadar |
|---|---|---|
| 16. | Guri. | |
| 17. | Magaalo. | |
| 18. | Bare. | |
| 19. | Maalin. | |
| 20. | Cudur. | |
| 21. | Wiil | |
| 22. | Miis | |
| 23. | Shaqo | |

## QAYBTA 3AAD: BUUXI MEELAHA BANNAAN (32 Dhibcood)

A. **Ku buuxi magac u yaalada ku habboon**: (16 dhibcood)

Adigu, Innaga,Iyaga,Iyagu,Iyadu, Idinka, Anigu,Isagu,innagu.

24. ________________ waa ay yimaadeen.
25. ________________caanaha ayuu jecel yahay.
26. ________________waxa aan raacay baabuur.
27. ________________waad ka habsaantay imtixaankii.
28. ________________fiid hore ayey seexatay.
29. ________________waan daalnay.
30. ________________ayaa naga fiican.
31. ________________ayaa ka dadaal badan.

**B. Ku buuxi meelaha bannaan falka ku habboon** (16 Dhibcood)

32. Jimcaale Cashar ayuu……………………………( qoray, daadiyay)
33. Ninku libaax ayuu ………………………………( lisay, dilay)
34. Bisad baa ………………………………………..(xirtay, carartay)
35. Axmed guri ayuu ……………………………… (dhisay, kariyay)
36. faarax wuu ……………………………………… (seexday, madow)
37. Wargays ayaan ………………………………….( fuulay, akhriyay)
38. Imtixaan ayaan …………………………………( diyaarinayaa, karinayaa)



78

www.somexams.com info@somexams.com © In cooperation with www.qalinqaad.com

**QAYBTA 4AAD:SU'AALO TOOS AH Ka jawaab waydiimahan** (12 dhibcood)

**39. Waa maxay maahmaah?**

........................................................................................................................................................................................................
........................................................................................................................................................................................................

**40. Keen hal maahmaah ah oo ka hadlasa aqoonta:**

........................................................................................................................................................................................................
........................................................................................................................................................................................................

**41. Sheeg macnaha maahmaahda aqoon la'aan waa iftiin la'aan:**

........................................................................................................................................................................................................
........................................................................................................................................................................................................

**42. Maxay ku kala duwan yihiin murti iyo maahmaah?**

........................................................................................................................................................................................................
........................................................................................................................................................................................................
........................................................................................................................................................................................................

**QAYBTA 5AAD**: CURIS **Ka qor curis ka kooban ugu yaraan 10 sadar nabadda** (10dhibcood)

**1.Nabadda:**

........................................................................................................................................................................................................
........................................................................................................................................................................................................
........................................................................................................................................................................................................
........................................................................................................................................................................................................
........................................................................................................................................................................................................
........................................................................................................................................................................................................
........................................................................................................................................................................................................
........................................................................................................................................................................................................
........................................................................................................................................................................................................

**DHAMAAD**

AMAL PRINTING CENTER 0619444116



☞ www.somexams.com info@somexams.com © In cooperation with www.qalinqaad.com